

Koorsada NORA

Koorso aad ku baranayso xuquuqda, fursadaha iyo la-qabsiga nolosha marka si adag lagu kala tago.



Familievernet
Bufetat



Ku saabsan koorsada NORA

Magaca koorsada iyo waxa lagu baranayo labadaba waxaa la sameeyay ayada oo la kaashanayo macaammiil xafiiska daryeelka qoyska weydiisatay koorso noocaan oo kale ah. Waxaa loo baahnaa in la ogaado xuquuqda, fursadaha iyo sidii nolosha loola qabsan lahaa marka la kala tago oo lala kulmo xaalado nololeed oo adag.

Koorsadu way kugu habboon tahay haddii aad isku aragto mid ama dhawr ka mid ah qodobbada hoose:

- Wuxaan dareemaysaa in aad ku jirto xiriir aan wanaagsanayn, waxaadna ka fikiraysaa in aad xiriirkaas ka baxdo, laakiin waa kugu adag tahay in aad ka baxdo.
- Wuxaan ka baqaysaa cawaaqibka ka dhalan kara kala-taggga, oo waxaad doonaysaa in aad ogaato fursadaha jira iyo xuquuqda aad leedahay.
- Wuxaan ka baqaysaa in uu kala-taggu keeno in aad kala go'daan carruurta, qoyska, saaxiibbada ama dadka aad ku xiran tahay.
- Wuxaan ka baqaysaa falcelin, koontarool, hanjabaad ama gacanqaad.
- Hadda ayaad ku jirtaa kala-tegid adag.



Sida soo socata ayaa koorsada loo qabtaa

Muddo siddeed maalmood ah oo ay koorsadu socoto ayaan waxaan dul mari doonaa siddeed mawduuc oo kala duwan oo ku saabsan xuquuqda iyo fursadaha bulshada ka jira, eegi doonaa deeqaha iyo adeegyada kala duwan, eegi doonaa xiriirka lala leeyahay qoyska, saaxiibbada iyo dadka lagu xiran yahay – iyo sidii uu qofku xaaladdiisa nololeed wax uga qaban lahaa oo isu caawin lahaa. Koorsada waxaa lagu qabtaa xafiiska daryeelka qoyska, waxaana hoggaamiya hadal-wax-ku-daaweeeyayaal [terapeuter]. Dad aqoon leh iyo hay'ado cilmi oo kala duwan ayaa cashirro ka bixin doona mawduucyada ay ku takhasuseen.

Koorsadu waa kuu habboon tahay haddii aad u aragto in aad wax ka faa'iidayso qaar ka mid ah mawduucyada soo socda:

- Caawinta sharciga ee bilaashka ah [fri rettshjelp] iyo xuquuqda dhaqaalaha
- Adeegyada jira, firfircoonda iyo goobaha ay bulshadu ku kulanto
- Xorriyat iyo koontarool
- Sidee loo samaystaa, loona ilaashadaa xiriirro wanaagsan
- Wadahadal ammaan ah iyo wadashaqayn wanaagsan
- Awood iyo awoodla'aan
- Falcelinta isbeddelka nolosha iyo xaaladaha adag
- Xudduudda, baahida iyo waxyaalaha qofka qiimaha u leh
- Iska-ilaalinta istareeska iyo isku filnaanta

Ujeeddada koorsadu waa sidii nolosha looga adkaan lahaa, tayada noloshana sare loogu qaadi lahaa.



Ma doonaysaa inaad ka qaybqaadato koorsada NORA?

Xafiiska daryeelka qoyska [familievernkontoret] la xiriir haddii aad u aragto in aad u baahan tahay koorsada NORA. Wuxaan kuugu yeeri doonaa kulan looga wadahadlayo qaadashadaada, halkaas oo lagugu siin doono warbixinta koorsada islamarkaana qiimayn lagu samayn doono in ay koorsado kugu habboon tahay iyo in kale.

Waxaa koorsada NORA bixiya xafiisyada daryeelka qoyska ee soo socda:

Xafiiska daryeelka qoyska ee Buskerud

Ciwaan: Grønland 68, 3045 Drammen

Telefoon: 466 17 710

Iimayl: fvk.buskerud@bufetat.no

Xafiiska daryeelka qoyska ee Vest-Agder, qaybta Kristiansand

Ciwaan: Markens gate 35, 4612 Kristiansand

Telefoon: 381 04 310

Iimayl: familievernkontoret.vest.agder@bufetat.no

Worbixinta koorsada oo intaan ka badan waxaad ka helaysaa:

www.familievernet.no